

# Barnaamijyada Ciwaanka Federaalka

## Qaybta I

Qaybta I (Title I) waa barnaamij dowladda dhexe ay maalgeliso iyadoo la adeegsanayo barnaamij kale oo la yiraa Sharciga Arday Walbaa Waa Najaxaa [Every Student Succeeds Act (ESSA)]. Ujeeddada sharciguna waa in la siiyo fursado kale oo dheeri ah ardayda si ay uga soo baxaan heerka-fasalka ay ku jiraan ee lagu guudmaray Heerarka Tacliinta ee Minnesota (Minnesota Academic Standards).

Si kolkaa iskuulku uu xaq ugu yeesho Qaybta I (Title I), waa in boqolkiiba qayb go'an oo ardaydooda ahi ay xaq u yeeshaan manfacyadda tacliinta. Iskuuladda Qaybta I (Title I) ku jira waxaa laga rabaa inay diyaariyaan qorshayaal sannadle ah si ay wax uga qabtaan baahiyo gaar ah. Qorshayaashi waxa ay ku salaysan yihiin baahiyo lagu ogaaday qiimeynta buuxda ee baahiyaha iyadoo ra'yi laga helayo ardayda, qoysaska, shaqaalaha iyo xubnaha beesha.

## Qasdiga

Barnaamijka Qaybta I (Title I) waxa uu u abuuraa fursado waxbarasho ardayda si ay u helaan aqoon iyo xirfado ayna uga soo baxaan heerarka gobolku rabo ee akhriska iyo xisaabta. Waxa uunu si weyn oo taxadar leh ugu dadaalaa baa'binta wixii carqadalado ah ee jira.

## Hadafyada

- Si loo siiyo gargaar ardayda si ay uga soo baxaan heerarka akhriska iyo xisaabta ee gobolku ka rabo
- In lagu kaabo akhriska fasalka dhexdiisa ah iyo barida xisaabta
- In loogu lug yeelo qoysaska tacliinta ardayda siyaabaha ugu badan ee suurtagalka ah

## Siddee ayaa maalgelinta loo isticmaalaa?

- Shaqaale dheeraad ah oo tacliinta, imaanshaha ah, ama gargaaro caafimaadka madaxa ah
- Khayraad iyo waxyaabo ay ku jiraan shaqaale dheeraad ah, ka qaybgelinta qoyska iyo waxyaabo kale
- Xaflado xiriirinta qoysaska ku saabsan
- Tababar dhanka dhaqanka ama tacliinta ah oo shaqaalaha la siiyo

### LABO NOOC OO GARGAAR AH

1. "Caawinta beegsiga ah" ruguhu waxa ay xushaan ardayda ka faa'iidi karta gargaarka la balaariyey waxa ayna siiyaan adeeg toos ah ardaydaa.
2. Adeegyo iskuulka oo dhan ah ayaa diyaar u ah dhamaan ardayda oo dhan.

## Iskuuladda

Adeegyadda iskuulka oo dhan ka jira ee Qaybta I (Title I):

- Forest Elementary
- Lakeview Elementary
- Meadow Lake Elementary
- Neill Elementary
- Northport Elementary

Adeegyadda Caawinta beegsiga ah ee Qaybta I (Title I):

- Cooper High School
- Robbinsdale Highview Academy

Iskuuladda aan ahayn Iskuuladda dowladda ee leh Qaybta I (Title I):

- Holy Trinity Lutheran Academy
- King of Grace Evangelical Lutheran School
- Sacred Heart Catholic School
- St. Raphael Catholic School

Qoysasku waxa ay xaq u leeyihiin inay codsadaan akhbaartan soo socota ee ku saabsan macallimiinta ardaydooda:

- In macallinku uu ka soo baxay shardiyaada gobolka iyo shuruudaha shatiga ee heerka fasalka iyo dhinacyada maadadda uu macallinku dhigayo
- In macallinku uu wax ku barayo ardayda baahi jirta oo degdeg macallin loogu baahday awgeed ama martabado kale oo ku meel gaar ah, iyadoo kolkaa shardiyaada gobolka ama shuruudaha shatiyada laga dhaafay
- In macallinku uu u haysto shahaado quman maadadda ama waxyaabaha uu dhigayo
- In ardaygu uu ka helo adeegyo kalkaaliyaha macallinka iyo in kale, haddii uu ka helo adeeg kalkaaliye, waa in la cadeeyo xaq u yeeladka kalkaaliyaha ee bixinta adeegyada.

**Qoysaska doonaya inay helaan akhbaartan waa inay qoraal soo qoraan iyagoo ku soo hagaajinaya ciwaanka:**

Robbinsdale Area Schools Human Resource Department  
Attn: ESSA Teacher Qualifications  
4148 Winnetka Ave. N.  
New Hope, MN 55427

## XAQQA OGAANSHAHA EE QOYSASKA

Sidda uu dhigayo xeerka ESSA, qoysaska leh arday dhigta iskuul leh Qaybta I (Title I) waxa ay xaq u leeyihiin inay codsadaan akhbaar ku saabsan shahaadooyinka iyo xirfadaha macallimiinta fasalka ardayda u dhigaysa iyo kalkaaliyeyaasha la shaqeeyaba.